



Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 105

30/07/2020

Xeerka Magacaabidda Xubnaha Maamulka Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99^{aad} (a), (b), (e) iyo (g) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 101^{aad} ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Taariikh nololeedka, Khibrada iyo Aqoonta ay leeyihiin, xubnaha loo magacaabay maamulka hay'adda Batroolka Soomaaliyeed.

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay 148/WBM/XW/20 ee 30/07/2020, kuna saabsanayd Magacaabista Xubnaha Maamulka Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed ee soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.99.07.20 ee 30/07/2020, kuna saabsan ansixinta Magacaabista Xubnaha Maamulka Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Markuu tixgeliyey: Baahida loo qabo in la magacaabo Xubnaha Maamulka Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed.

Wuxuu magacaabay:

Qodobka 1^{aad}

Magacaabid

Waxa loo magacaabay Xubnaha hoos ku qoran mid walba xilka ku hor qoran: -

- | | |
|---|-----------------------------|
| 1- Mudane Ibraahin Cali Xuseen | Guddoomiyaha HBS. |
| 2- Marwo Caaisha Cusmaan Axmed | Guddoomiye Ku-xigeenka HBS. |
| 3- Mudane Ibraahin Axmed Layte | Xubin. |
| 4- Mudane Cabdulqaadir Aadan Maxamuud | Xubin. |
| 5- Mudane Ibraahin Cabdulqaadir Maxamed | Xubin. |
| 6- Mudane Axmed Xaaji Cabdi | Xubin. |
| 7- Mudane Cabdixafiid Cali Dirir | Xubin. |
| 8- Mudane Mahad Maxamed Sh. Xasan | Xubin. |

Oodobka 2^{aad}

Dhaqan-gal

Magacaabiddani, waxa ay dhaqan-gelaysaa marka uu Saxiixo Ku-simaha Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mahdi



Mudane Mahdi Maxamed Guuleed "Chadar"
Ku-simaha Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS